OCHA Soomaaliya. Warbixinta #2-aad

Saameynta fatahaadaha | 28 Oktoobar 2019

Xaaladda Guud

Roobabka Deyrta oo isgu jiray kuwo dhexdhexaad ah iyo kuwa badan ayaa xili hore ka bilowday qeyba badan oo ka trirsan Soomaaliya. Dhulka buuraha Itoobiya, oo ah asaaska webiyada Juba iyo Shabelle, ayaa sidoo kale waxaa ka da'ay roob fiican todobaadyadii la soo dhaafay, sida ay sheegtay Waaxda Maamulka Biyaha iyo Dhulka ee Soomaaliya oo ay maamusho FAO ee la yirahdo SWALIM. Taas waxey sababtay in deegaanada ay maraan webiyada Juba iyo Shabelle laga dareemay biyaha oo soo batay todobaadyadii la soo dhaafay. Fatahaado ayaa ka dhashay deegaanada maamulada Hirshabelle, Jubaland iyo Koonfur Galbeed. Daadad ayaa sidoo kale laga so sheegay gobolka Banaadir, Jowhar, Ceel Cade iyo Jamaame. Deegaano ka tirsan Koonfur Galbeed ayaa sidoo kale daadadku saameeyeen.

Suuq ku yaalo Belet Weyne oo webiga ku fatahay.

Waxaa mar kale todobaadkaan la saadaalinayaa roobab fiican iney ka da'aan Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya iyo deegaanada buuraleyda ee Itoobiya. Sida laga soo xigtay SWALIM, biyaha webiga oo soo batay, iyo fatahaad ku socoto deegaanada u dhow meelaha webiyada Juba iyo Shabelle ay maraan ayaa waxaa laga cabsi qabaa iney ka sii daraan. Daadad ayaa iyagana la filayaa iney ka dhacaan deegaanada boojiga oo la filaayo in sidoo kale ay roobab fiican ka da'aan. Hasayeeshee, saadaashu waxey muuujineysaa in ay hoos u dhacayaan roobabka deegaanada woqooyi ee dalka.

Saameynta baniaadamnimo iyo baahida

Qiyaas ahaan 182,000 oo qof ayey ilaa haatan barakiciyeen daadadku iyo fatahaaduhu, sida ay sheegtay Waaxda Kormeerka Badbaadada ee Hay'adda UNHCR- (PRMN). Dhul beereed, wadooyin iyo dhismayaal ayaa burburay, waxaana qasaaro ay gaartay howlaha nolol maalmeed ee goobaha fataahadu ka dhacday.

Waddo dhex marta Belet Weyne oo ay sameeysay fatahaaddu

Webiga Sahbelle qeybaha uu ka maro magaalada Balat Weyne iyo deegaanada agagaarkeeda ah ayaa soo buux dhaafiyay 26-dii Oktoobar 2019, taas oo sababtay in magalaadu fataahad ka dhacdo. Sadex qof, oo ay ka mid yihiin laba caruur oo da'adoodu ka hooseyso 10 sano jir, ayaa lagu waayay fatahaadaha. Warbixinadii ugu dambeeyay ee 28-da Oktoobar waxey muujinayaan in 20 qof ay dooni kula degtay magaalada Belet Weyne. Tirada rasmiga ah ee dadka ku waxyeeloobay lama oga maadaama weli ay socdaan dadaallada lagu raadinayo ayadoo la isticmaalayo dayuurad kuwa qumaatiga u kaca ah oo ay bixisay UNSOS. Dad lagu qiyaasay 164,000 oo qof ayaa barakacay, waxey intooda badan ku sugan yihiin deegaanka Ceel Jaale, sida ay sheegtay PRMN. In ka badan 85% magaalada Balat Weyne waxaa fariistay biyo. Wadada isku xirta Balat Weyne iyo Ceel Jaale – oo dadka loo raray – waxaa mari kara kaliya baabuurta waaweyn. Xaafadaha fataahaduhu aad u saameyeen ee magaalada Belet Weyne waxaa ka mid ah Kooshin iyo Xaawo Taako. Magaalooyinka Jowhar iyo Mahaday Weyne ee ismaamulka Hirshabelle, fatahaadu waxey saameysay dhul beereed weyn. Webiga Sahbelle qeybtiisa magaalada Jowhar ayaa la filayaa inuu karkaarrada jabsado maalmaha soo socda marka fatahaadda ka socoto Belet Weyne ay hoos u soo degto. Ku dhawaad 40 goob oo biyaha webiga ay ka furan karaan ayaa waxaa soo sheegay SWALIM bishii Sebteembar 2019 waxaana laga yaabaa iney sababaan fatahaadda oo kasii darto.

Ismaamulka Jubaland, oo ku dhawaad 5,300 oo qof ay fataahdu saameysay, qeybaha webiga Juba ee Baardheere, Dollow, Luuq, iyo Buale ayaa soo buux dhaafaya tan iyo bartamahii bisha Oktoobar taasoo sababtay fataahad ka

dhacdo afaafka hore ee webiga. Magaalada Bardheere ayay aad u saameysay fatahaaadu, iyadoo qeybo ka tirsan magaalada ay biyo fariisteen. Saadaashu, waxey muujineysaa sara u kac yar oo biyaha webiga ah in laga yaabo iney sababto fatahaad ka dhacdo deegaanada uu webiga maro. Degaanada Jamame, Jiimey iyo Sanguuni,dad aan tiradoodu la xaqiijinin oo degan agagaarka webiga Juba ayaa waxaa sidoo kale barakiciyay fatahaad, kuwaas oo qaarkood ay u guureen deegaanka Singlayr.

26-dii Oktoobar, Ismaamulka Koonfur Galbeed, maamulada maxaliga iyo iskaashatada arimaha baniaadamnimo waxey u sheegeen OCHA, in roobab xoogan oo ka d'ay degmada Berdale ee gobolka Bay iyo biyaha wqebiga Juba oo soo buux dhaafiyay ay sababeen daadad saameeyay 30,000 oo qof oo ay ka mid yihiin 12,000 caruur ah. Dadka ay daadadku saameeyeen ayaa u cararay dhulka jooggiisu sarreeyo kadib markii ay biyo guryaha ugu soo galeen. Dadka ay daadadku barakiciyeen ayaa waxey baahi weyn u qabaan biyo nadiif ah, cunto, musqulo ku meel gaar ah iyo hoy. Roobabka socda ayaa saameyn ku yeeshay adeegyada iyagoo xadiday dhaqdhaqaaqyada, taas oo sidoo kale saameysay gaarsiinta raashinka iyo agabka kale suuqyada wadooyinka xiran awadood. Daadad ka dhacay qeybo ka tirsan gobolka Bay ayaa sidoo kale saameyay isgaarsiinta wadooyinka Baydhabo. In ka badan 30 baabuurta xamuulka ah oo sida raashiin iyo alaab loo siday deeganada u dhow Baydhabo ayaa ku xayirmay magaalada, roobabka socda awadood.

Gobolka Banadir oo ilaa 3,000 ay ku barakeceen, maamulada maxaliga iyo madaxda deegaanada barakacayaasha waxey soo sheegeen burburka ilaa 170 hoy iyo 210 musqul oo ku yaala degmada Kahda ka dib roobab xooggan oo da'ay. In ka badan 20 deegaan oo dadka barakacayaasha ah ku sugnaayeen ayaa waxaa ka burburay musqulaha. Waxaa jiro walaac laga qabo in musqulaha burburay ay ku darsamaan biyaha daadaka, taas oo saro u qaadeyso khatarta ah iney dilaacaan cudurada biyaha wasakhda ka dhasho/daacuunka.

Maareynta iyo ka jawaabidda xaaladda biniaadamnimo

Iskaashatada arimaha bini'aadamnimo waxey la shaqeynayaan maamulada qaran iyo kuwa maxaliga iyagoo sara u qaaday ka jawaabidda iyo gargaarka la gaarsiinaayo goobaha ay fatahaadu saameysay. 21-kii Oktoobar, Wasaarada dowlada Federaalka ee Arimaha Baniaadamnimo iyo Maareynta Musiibooyinka, ayaa warbixin ay soo saartay uugu baaqday iskaashatada arimaha baniaadamnimo iney kordhiyaan dadaaladooda. Si sara loogu qaado howlaha gargaarka, Raaiisul Wsaare Xasan Cli Khayre wuxuu magacaabay guddi wasiiro isku dhaf ah oo la shaqeyn doono maamulada federaalka. Gudiga, oo kulankii ugu horeeyay yeeshay 26-da Oktoobar, waxaa guddoon u ah Wasiirka dowlada Federaalka ee Arimaha Baniaadamnimo iyo Maareynta Musiibooyinka.

Ismaamulka Hirshabelle, madaxweyne Maxamed Cabdi Waare wuxuu sameeyay guddi la tacaalo xaaladda deg degga ee fatahada si ay u maareeyaan arimaha baniaadamnimo waxeyna la shaqeyn doonaan gudi heer federal ah oo dowlaada federaalka horay u sameysay. Gudbinta fariinta digniinta hordhaca ah ee laga bixiyaya deegaanada fatahaada khatarta ugu jira waa la wadaa waxaana la bixinayaa biyo nadiif ah oo loogu talo galay 72,000 oo qof oo ku sugan Belet Weyne mudo 18 maalmood ah. Laba xarumood oo isbitaalo ku meel gaar ah ayaa laga sameeyay Ceel Jaale, hay'adaha samafalku waxey bixiyeen 525 baco ah oo ay siiyeen dadka ugu daran. Kuwo kaloo dheeri ah ayaa la bixin doonaa maalmaha soo socda. Afar doomood ayaa haatan loo isticmaalayaa badbaadinta dadka ku sugan deeganada go'adoomay. Si loo xaqiijiyo ammaanka iyo badbaadada dadka, xarun boolis ah ayaa laga sameeyay deegaanka Ceel Jaale oo ay degan yihiin inta badan dadka fatahaadu barakicisay. Cunno loogu tala galay 4,000 oo qoys ayaa la filayaa in goor dhow ay Belet Weyne soo gaarto. Arimaha fayaha dhowrka, caafimaadka, iyo waxbarasho deg deg ah ayaa aad loogu baahi qabaa.

Ismaamulka Koonfur Galbeed, iskaaashatada arimaha fayadhowrka iyo maamulka xeryaha barakacayaasha waxey la shaqeynayaan dadka tabaaleysan si ay u wanaajiyaan saaridda biyaha fariistay deegaanadooda. OCHA waxey la shaqeyneysaa hay'adaha samfalka iyo maamullada si loo yareeyo khatarta cudurada. Maamulada waxey codsadeen taageero, gaar ahaan hooy deg deg ah oo ku meel gaar ah, mara kaneecooyin, daawada biyaha lagu nadiifiyo iyo wixii gargaar ah oo la mida.

Si aad u heshid xog dheeri ah, fadlan la xiriir: Tapiwa Gomo, Madaxa Xiriirinta Warbaahinta, gomo@un.org, Tel. +252 616 548 007. Mursal Ali Ahmed | Sargaalka Xiriirnta Warbaahinta, mursalali@un.org, Tel: +252619150457/ 252615679998. Ayub Ahmed | Sargaalka Xiriirnta Warbaahinta | Mobile: +252619150463 | Email: ayub.ahmed@un.org. Yahya Dahiye | Sargaalka Xiriirnta Warbaahinta | Mobile: +252618180926| Email: yahya.dahiye@un.org.

***